

Kusoo dhawoow **POST 7**

Rugta caafimaadka

Post 7 waxaa gaar ahaan loogu tala galay bukaanka qaba cudurrada sambabbada, kansarka iyo cudurrada dhiigga.

Shaqaalaha post 7 waxay ka kooban yihiin dhakhtarro, kalkaalisoooyin caafimaad, khabiir nafaqo, jir-daryeele (fysioterapeut), hawl-geliye (ergoterapeut), hadal-kaabe (logoped) iyo hawlwadeen arrimo bulsho (sosionom). Waxaad mar walba haysataa kalkaaliso caafimaad oo mas'uul ka ah bukaanka isla markaana kuu diyaarinaya baaristaada iyo daaweyntaada.

Telefon post 7: 23 22 58 70

Mahadsanid

Caroline Hammer

Kalkaaliso caafimaad ee waaxda

S. 2

Ku socoto: adiga bukaanka ah

Dawooyinka neef-qaadashada iyo caawiyayaalka

Markii isbitaalka lagu dhigo, waa inaad wadataa dawooyinkaaga neef-qaadashada iyo caawiyayaalkaaga aadna u isticmaashid sidaad caadi ahaan u isticmaashid. Caawiyayaalka waxaa tusaale u ah BiPAP, CPAP ama aaladaha lagu neef-qaato. Kalkaalisada caafimaadku diyaar bay u tahay inay kuugu soo celiyo sida loo isticmaalo caawiyayaalka.

Dhakhtarradu waxay booqasho ku yimaadaan inta u dhaxaysa saacadda 09:30 iyo saacadda 15:00 maalmaha shaqada oo dhan.

Sabtida iyo axadda iyo waqtiga fiidnimada waxaa dhakhtarku booqdaa bukaanka cusub iyo kuwa baahiyo gooni ah qaba xaaladdooda jirro darteed oo kaliya. Waxaa fiican inaad la ballantid kalkaalisadaada caafimaad haddii aad doonaysid inaad ka tagtid waaxda, si aysan taasi ugu beegmin baarisyada, daaweynta iyo booqashada dhakhtarka.

Qolka ilaalintu wuxuu ku yaal bartamaha waaxda. Halkaan imow haddii aad su'aal qabtid. Waxaad isticmaali kartaa **xarigga wicista** ee sariirta haddii in lagu yimaadaa ay lagama maarmaan tahay.

Waqtiyada cuntada

Qadada waxaa laga bixiyaa miiska laga qaato laga bilaabo saacadda 12:30 ilaa 12:55. Waqtigaas wixii ka baxsan waa laga qaadan karaa cunto iyo cabitaanba halkaas qadadu taal maalinta oo dhan. Haddaadan adigu soo qaadan karin, annagaa ku caawinayna.

Nadaafadda gacmaha si looga hortago jirro is-qaadsiinta

Bukaan ahaan markaad isbitaalka joogtid si gooniya ayaad ugu nugushahay in jirro lagu qaadsiyo. Aad bay muhiim u tahay in laga hortago in lays qaadsiyo faysas (virus), shuban, hargab iyo waxyaabo kale. Waxaan doonaynaa inaad dad kale jirro ka qaadan adigana aanay dad kale jirro kaa qaadin. Sidaa darteed waa in adiga iyo qaraabadaaduba aad si gooni ah uga taxaddartaan nadaafadda gacmaha.

Waxaad ka helaysaa gacmo-mayr iyo/ama bakteeriyoy-dile ku dheggen derbiga korridoorka iyo qolalka/suuliyaaasha oo dhan. Intaadan kasoo qaadan cunto iyo cabitaan miiska qadada, waa inaad mar walba mayrtaa gacmaha ama u isticmaashaa bakteeriyoy-dilaha gacmaha.

S. 3

Alaabta qiimaha leh

Annagoo ka xun, tuugo ayaa ka dhacda qolalka, isbitaalkuna mas'uul kama noqon karo wixii alaab qaaliyaa ee qolka la dhigto. Alaabta qaaliga ah waxaa fiican in loo dhiibto qaraabada oo guriga la geysto, ama waxaa lagu xiri karaa meel ayadoo caddayn lagu siinayo markii aad timaaddid waaxda post 7. Haddii aad doonaysid inaad haysatid alaabtaada qaaliga ah, isbitaalku kuuma gudayo qiimahooda haddii lagaa xado.

Internett:

1. Ka dooro netka – LDS-Gjest. Waxaa kuu furmi doona daaqadda laga galo internet-ka.
2. Ku qor lambarka telefoonkaaga afar-geeska «Legg inn mobilnr her». Waxaa SMS kuugu soo dhici doona lambar baaq ah (password-ka).
3. U isticmaal baaqaas «password». Lamarka telefoonkaaga ayaa kuu ah magaca isticmaalaha «username».

Wehel

Isbitaalku wuxuu leeyahay shaqaale diyaar u ah wada-hadal ku saabsan mawduucyo kala duwan. Hawl-wadeenka arrimaha bulshadu wuxuu aqoon ballaaran u leeyahay arrimaha ku saabsan xuquuqda iyo fursadaha la xiriira NAV. Wadaaddadeenna masiixiyiintu waxay waayo-aragnimo iyo aqoon ballaaran u leeyihiin inay la hadlaan dad ku jira xaalad-nololeedyo kala duwan ayagoo si fiican ula sheekaysan kara cid walba, waxay doonaan ha rumaysnaadeene. Taa waxaa dheer in lala xiriiri karo dad ka socda caqiidooyinka kale.

Gaari dhigasho

Gaari dhigashadu waa lacag inta deegaanka u ah isbitaalka. Wixii intaas dheer ka akhriso mashiinnada laga goosto lacagta baabuur-dhigashada. Haddii aad adigu leedahay baabuur aad dhigatay inta isbitaalka lagu dhigay, markaas la xiriir shaqaalaha.

Wada shaqayn ku saabsan caafimaadkaaga

Waxaan doonaynaa inaad dareentid daryeel iyo daaweyn wanaagsan intaad joogto qaybtayada «post 7». Si loo joogteeyo awooddaada iyo hawlqabadka jidhkaaga, waxaa muhiim ah inaad isticmaashid jidhkaaga intaad isbitaalka joogtid. Haddii ay suuragal tahay, waxaad sidaas ku samayn kartaa inaad u qumto daryeelkaaga iyo labbiskaaga subaxdii, iyo inaad adigu soo qaadatid cuntadaada iyo qaxwahaaga.

S. 4

Ku socoto: adiga ah qaraabada

Qaraabada ugu dhow

Haddii bukaanku doonayo in adiga/idinka laydin siiyo warbixinta la xiriirta dhigistiisa isbitaalka, waxaa wanaagsan inaad isla garataan hal qof oo aannu la xiriirno. Taasina waa in laga kaaftoomo telefoon-diris badan, maaddaama aan doonayno inaannu waqtiga ugu badan ku isticmaalno bukaanka.

Waqtiga booqashada: saacadda 11:00 – 19:00, weliba kadib saacadda 15:00, maaddaama aanu waqtigaasi ku beegmayn daaweynta iyo baarisyada.

Cunto iyo cabitaan

Dadka booqashadu way ka qaadan karaan qaxwe iyo shaah meesha la dhigay. Cuntada waxaa gooni u leh dadka bukaanka ah. Qaraabada doonaysa cunto, waxay tegi karaan makhaayadda isbitaalka ee dabakha 2aad iyo biibitada ku taal dabakha 1aad.

Waqtiyada furitaanka:

Biibitada (Narvesen) ee hoolka laga soo galo, waxay furan tahay: 07.00-19.00 maalmaha shaqada, sabti 10.00-17.00, axad 11.00-17.00.

Makhaayadda isbitaalka waxay furan tahay saacadda 09:30-15:30 maalmaha shaqada oo dhan.

Farmashiga isbitaalka wuxuu furan yahay isniin 09:00-16:00 iyo talaado - jimce 08.00-16.00.

Kaniisadda isbitaalka waxay ku taal dabakha 3aad, mar walbana way furan tahay. Waxaa kulan cibaadaysi lagu qabtaa axad kaste saacadda 11.00.